


## WAXYAABAHA AAD KA OGAANAYSO EE KU SAABSAN GUDNIINKA XUBINTA TARANKA HAWEENKA



<http://fgm.co.nz/where-is-fgm-practiced/>

### Asalkii hore

- Ugu dhawaan 200 milyuun oo haween ah iyo gabdho ah oo adduunka ku nool ayay hadda dhib ka soo gaadhaa cawaaqibka xun ee FGM kuwaas oo sidoo kale loo yaqaano Jarinta Xubinta Dheddiga ama Gudniinka Dheddiga oo dhaqanka inta badan aad looga fekero Aasia, Bariga Dhexe iyo Afrika. ([www.who.int/mediacentre/factsheets/fs241](http://www.who.int/mediacentre/factsheets/fs241))
- Canada waxay manuucday FGM – Waa Weerar Waxyeelo Jidhka ah oo lagu ciqaabi karo sharciga

### Darasada Cilmi baadhida

- ***Uzima Women Relief Group International (Kooxda Samafalka Haweenka Caalamiga ah ee Uzima)*** waxay qabteen darasad walaacyada caafimaadka oo ku saabsan haweenka uu saameeyay dhaqanka FGM
- Daraasada waxa lala qabtay haweenka Afrikaanka ee Toronto kuwaas oo ka yimid wadamada Afrika ee lagaga dhaqmo FGM.
- Ujeedada cilmi baadhida waxay ahayd in la sahamiyo waxay yihiiin walaacyada iyo arramaha caafimaafka haweenka qaba FGM ay la kulmayaan siiba go'aan ka gaadhida fahankooda sharciga Canada ee ku lidka ah.
- Waraysiyo haweenka, sida bulshooyinku u arkaan iyo khibradaha adeeg bixiyayaasha ayaa la eegaayey

### Natiijooyinka cilmi baadhida

- 21 haeen ah, 11 adeeg bixiyayaal ah iyo 8 hogamiyayaasha bulshadda ah aa la waraystay.

- 47% (10/21) haween ah oo la waraystay waxay sheegeen in FGM yahay mowduuc xurmo darro ah oo haweenka qaarkood waxay kala baqan karaan inay u sheegaan adeeg bixiyayaashooda.
- In ka badan 90% (20/21) haween ah oo la waraystay waxay soo mareen qaabka FGM (gudniinka ah) taas oo dhacday inti u dhaxaysay carruurnimada iyo qaan gaadhnimada. Tani waa tilmaan in haween badan oo ka soo jeeda Afrika ay la noolyhiin waayo aragnimada FGM.
- Dhammaan haweenku waxay muujiyeen walaac ku saabsan waxyeelada la xidhiidha dhaqanka iyagoo sheegaya in badan dhaawacu uu yahay joogto oo aan laga noqon karin.
- Hogaamiyaasha bulshadda qaarkood waxay sheegeen in loo sameeyay asbaabo dhaqanka iyo diinta ku lug leh labadaba.
- Qaar ka mid ah hogamiyaasha bulshadda ee xagga diintu waxay sheegeen in niyada wanaagsan iyo edaabktaba dhidibada loogu taagi karo waxbarashadda iyo wax barista iyaddoon la sababin waxyelo jidhka ah.
- Dhammaan ka qaybgalayaashu waxay aqbaleen inay jirto waxyelo halis ah oo la xidhiidha FGM oo waxay ka muujiyeen walaacyada caafimaadka ee haweenka iyo bulshooyinka oo dhan
- Dhammaan haween kala waraystay, FGM waxaa lagu sameeyay guriga halkii ay ka ahaan lahayd cusbitaalka.
- Sababaha loo siiyay FGM waxaa ka mid ahaa:
  - U gudbitaanka haweenimada
  - Dhimista doonista galmadda
  - Curfiyada dhaqanka/Diinta si looga ilaaliyo hablaha damaana qaadka mowqifka niyadeed ee sareeya ee guurka.
  - Ikhtiyaarka qoyska

#### ***Walaacyada Bulshadda:***

- Ka hadalka FGM ka baxsan kooxda dhaqanka
- Ceeb
- Waa wax xadka shukaansiga ka baxsan dhaqanka sababtoo ah sharaf dhaca ka socda FGM gudaha Canada.
- Sharaf dhaca Xidhiidhka
- Khiyaamada ragga xaaslayda ah
- Furiinka

#### ***Walaacyada Caafimaadka:***

- Dhammaan haweenka waxay dhib ka soo gaadhay cawaaqibka FGM ay ku jirto:
  - Naxdin darran oo nafsaaniya oo ay keentay arrimaha cafimaadka maxkada sida walbahaar iyo qulub
  - Carqaladaha nidaamka taranka iyo kaadida
  - Dhiigbaxa
  - Naxdin
  - Dhibtooyinka dhalmada
  - Ku raaxeysiga galmaada oo yaraata
  - Dhiiga caaddada oo xanuun keenta

***Walaacyada Adeegyada Caafimadka:***

- Ay adag tahay in lala xidhiidho dhakhtarada
- Adeeg bixiyayaasha lama baro wax ku saabsan FGM
- Fahan la'aanta FGM si loo horjoogsado dhaqanka
- Ku qanac yaraanta adeeg bixiyayaash sababtoo ah:
  - Wakhtiyada sugitaanka
  - Dakhtarada oo aan siinayn ahmiyad ku filan

***Tallooyinka Uzima Relief Group International (Kooxda Samafalka Caalamiga ah ee Uzima)***

- Waxbarashadda iyo wacyi gelinta FGM waxaa looga baahanyahay bulshooyinka iyo adeeg bixiyayaasha
- Tallaabooyinka ha hortagga ah waa in la qaadaa si loo dhaqan geliyo sharciga ku lidka ah FGM.
- Wax ka qabta ku lid ahaanta cadaadiska qaab toos oo awood lagu siinayo haweenka
- Waa inay jiraan qayb calaamada muuqata ah iyo ololaha hay'adaha daryeelka Caafimaadka si loo muujiyo taageerada xuquuqaha haweenka ee ku xeeran FMG.
- Waa inay jiraan nidaamyada taageerada bulshadda ee haweenka ee tafiirta Afrikaanka si loo kobciyo fursadda bulshadda loo dhex galo oo looga hadlo arrimaha dhaqanka.

Daraasada waxaa maagelisay



<http://www.womensresearch.ca/>

Akhri warbixinta buuxda ee websaydka WCH iyo UZIMA



**Uzima Women Relief Group International**  
*Giving a new meaning of Life, hope and bright future to all women*

[www.uzimawomeninternational.org](http://www.uzimawomeninternational.org)